

Providence Medicare Advantage Plans
Lacagta khidmadda Caymiska ee Billaha ah ee Qorshaha ee loogu
talagalay Dadka Hela Caawinaada Dheeraadka ah ee ka timaadda
Medicare si ay uga Caawiso Bixinta Kharashaadkooda
Daawooyinka Dhakhtarku Qoro.

Haddii aad Caawinaada Dheeraadka ah ka hesho Medicare si aad isaga bixiso kharashaadka qorshaha daawooyinka dhakhtarku qoro ee Medicare, lacagta khidmadda caymiska ee billaha ah ee qorshaha ee aad ku bixineyso caymiska waxay noqon doontaa mid ka hooseysa inta ay ahaan lahayd haddii aadan helin Caawinaada Dheeraadka ah oo ka timaada Medicare.

Haddii aad hesho Caawinaada Dheeraadka ah, lacagta khidmadda caymiska ee billaha ah ee qorshaha waxay noqon doontaa \$0 mid kasta oo ka mid ah qorsha-ha(yaasha) hoos ku xusan. (Tani kuma jirto midna lacagta khidmadda caymiska ee billaha ah ee laga yaabo inaad ku bixiso Medicare Part B.)

- Providence Medicare Prime + Rx (HMO)
- Providence Medicare Timber + Rx (HMO)
- Providence Medicare Pine + Rx (HMO)
- Providence Medicare Sycamore + Rx (HMO)

Haddii aad hesho Caawinaada Dheeraadka ah, lacagta khidmadda caymiska ee billaha ah ee qorshaha ayaa lagaa dhimayaa qorsha-ha(yaasha) hoos ku xusan.

- Providence Medicare Extra + Rx (HMO)

Khidmadda caymiska ee billaha ah ee Providence Medicare Advantage Plans waxay ka mid ah daboolista adeegyada caafimaadka iyo caymiska daawooyinka dhakhtarku qoro labaduba.

Haddii aadan heleynin Caawinaada Dheeraadka ah, waxaad ogaan kartaa in aad u qalanto adigoo wacaya:

- 1-800-Medicare ama isticmaalayaasha TTY-ga waca 1-877-486-2048 (24 saacadood maalintii /7 maalmood usbuucii),
- Xafiiska Medicaid ee Gobolkaaga, ama
- Maamulka Shooshiyal Sikuuritiga kala xidhiidh 1-800-772-1213. Isticmaalayaasha TTY-ga waa in ay wacaa 1-800-325-0778 inta u dhaxaysa 8 a.m. ilaa 7 p.m., Isniinta ilaa Jimcaha.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan ogeysiiskan, fadlan ka wac Adeegga Macaamiisha lambarka 503-574-8000 ama 1-800-603-2340 (Isticmaalayaasha TTY-ga waca 711) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Laga bilaabo 1da Abriil ilaa 30ka Sebtembar, saacadaha shaqadu waa Isniinta ilaa Jimcaha, laga bilaabo 8 a.m. ilaa 8 p.m. (Wakhtiga Baasifiga). Laga bilaabo 1da Oktoobar ilaa 31da Maarso, saacadaha shaqadu waa Axadda ilaa Sabtida (7 maalmood toddobaadkii), laga bilaabo 8 a.m. ilaa 8 p.m. (Wakhtiga Baasifiga). Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa barta [ProvidenceHealthAssurance.com](https://www.ProvidenceHealthAssurance.com).